



Sanad Dugsiyeedka 2022-2023

Waalidka/Daryeelka Qaaliga ah:

Fasalka ilmahaaga ee dugsiya waxaa loo xushay in uu ka qayb qaato *Baaritaanka Qosolka iyo Koriinka Caafimaadka leh ee Oregon "Oregon Smile and Healthy Growth Survey" ee 2022 ee gobolka oo dhan laga samaynayo* – oo ah baaritaan la xiriira caafimaadka ilkaha iyo cabirka baaxada jirka ee Oregon ee ardayda fasalada 1-aad, 2-aad iyo 3-aad. Baaritaankan muhiimka ahi waxay taageero ka geysanaysaa in la wanaajiyo caafimaadka iyo fayyo-qabka carruurta Oregon. Ilmaha caafimaadka qabaa waa mid diyaar u ah in uu waxbarto oo horumar gaaro.

Baaritaanku wuxuu qaadan doonaa wax ka yar labba daqiiqadood ilmihiiiba iyadoo aanu lahayn wax xanuun ah. Ilko nadiifiye ayaa fiirin doono ilkaha ilmahaaga waxaana diiwaanka la gelin doonaa dhererka iyo miisaanka ilmahaaga iyadoo la fiirinayo cabirka baaxada jirka (BMI). Ma jirto doonto daaweynta ilkaha ah ama raajatada 'x-rays' ilkaha. Dhammaan hab-dhaqanka caafimaadka iyo badbaadada COVID-19 ayaa la raaci doonaa.

Baaritaankani waa mid lacag la'aan ah iyada oo natiijada qiimeynta caafimaadka ilkaha ee ilmahaaga loo soo diri doono guriga iyadoo ilmahaaga loo soo dhiibi doono. Ilmahaagu wuxuu heli doonaa burushka ilkaha lagu rumayo/cadayo oo lacag la'aan ah. Haddii la ogaado in ay jirto baahi dhanka ilkaha oo degdeg ah, waxaa lala wadaagi doonaa qof shaqaale oo ka tirsan dugsiya oo kaa caawin kara in aad hesho daryeel bixiyaha ilkaha haddii aad u baahan tahay. Qiimeyntan la xiriirta caafimaadka ilkuhu beddel uma noqonayso baaritaannada ilkaha ee caadiga ah ee dhakhtarkaaga ilkaha. Carruurta oo dhan waa in ay arkaan dhakhtarka ilkaha hal mar sanadkii. Haddii aad taageero uga baahan tahay helida dhakhtarka ilkaha, fadlan la xiriir 211info adiga oo wacaya 2-1-1 ama 1-866-698-6155. Waxaad sidoo kale booqan kartaa website-kooda <https://www.211info.org/>.

***Ilmahaaga waa la baari doonaa. Haddii aadan rabin in ilmahaaga la baaro, fadlan dugsiya ugu sheeg qoraal ahaan waqti hore.***

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan baaritaankani, fadlan Karen Phillips, Barnaamijka Caafimaadka Afka ee Gobolka kala xiriir 971-412-0531. Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. La xiriir 971-673-0252 (TTY 711). Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.

Waad ku mahadsan tahay taageeradaada!

Si Daacadnimo leh,

Kooxda Baaritaanka Qosolka iyo Koriinka Caafimaadka leh ee Oregon ee 2022.  
Barnaamijka Caafimaadka Afka, Qaybta Hooyada iyo Caafimaadka Carruurta,  
Maamulka Caafimaadka Oregon

Somali version